



# Wararkii u dambeeyey: Qorsheynta Xilliga Dayrta 2020

Qoysaska Qaaliga ee PPS,

Waxaan idiin rajeyneynaa in aad ku raaxaysaneysa fasaxiini xaggaaga idinka oo nabad iyo caafimaadba qaba. Waxaan idiinka mahadcelineynaa in aad nala wadaagteen jawaabcelintii ku saabsaneyd sahankii dib ugu soo noqoshada ee aan dhawaan idiin soo dirnay. Iyada oo ay jiraan wali dhowr arrimood oo u baahan in faahfaahintoodii la soo dhammeystiro, waxaan jecelnahay in aan wararkii ugu dambeeyey idinla socodsiiino ee dadaalka aan ugu jirno sidii loo xaqiijin lahaa sidii loo furi lahaa sanad-dugsiyeedka soo socda 2020-21 inuu noqdo mid leh bilow caafimaad qaba.

Anaka oo tixgalin siineyna, waxaan dheelitireynaa dhammaan go'aanadayada la siinayo siinanta jinsiyada iyo cadaalada bulshada iyo waliba waxaan raaceynaa mabaa'diida na hoggaaminaya intii aan ka shaqeyneyn hawlahani ee ka mid yihiin:

- Sidii loo xaqiijin lahaa fayo qabka iyo caafimaadka shaqaalaheena, ardaydeena iyo iskuuladeena.
- Isbedel lagu sameeyo manhajka iyo casharada iyada oo la siinayo jawi ay wax ku bartaan oo lagu xaqiijinayo casharada ugu muhiimsan ee siinaya ardayda garashooda ay u baahan yihiin inay waayo-aragnimo ka helaan iyo fursadaha ardayda la siinayo sidoo kale u oggolaanaya dhammaantood sidii ay u guuleysan lahaayeen inay dhisaan aqoontooda, xirfadaha iyo una habeyn lahaayeen sawirka ay ka bixinayaan Sawirka Guud ee Qalin-Jabiyaasha PPS.
- Sidii loo abuuri lahaa in la isku xiro xiriirkii ka dhaxayn lahaa iskuuladeena iyo guud ahaan bulshadeena.

Waxaan soo saari doonaa faahfaahin dheeraad ah iyo macluumaad saldhig u ah oo aan idinla wadaagi doono todobaadka soo socda, laakiin waxaan halkan ku qoran waxyaabaha aan diirada saareyno marka aanu soo dhammeystirno qorshaheena xilliga Dayrta 2020:

- Sidii mudnaanta loo siin lahaa ardayda Madowga ah iyo kuwa Maraykan Asalka ah, iyada oo la raacayo Tallaabada Malaheena (Theory of Action) in lala shaqeeyo kooxahaasi oo si xad dhaaf ah u saameeyey xanuunka saf mareenka ah.
- In la siiyo mudnaanta ardayda leh baahiyaha gaarka ah ee waxbarasho addeegyada ay u baahnaayeen iyo in diirada la saaro baahiyaha ardayda iyo caafimaadka ay u baahan yihiin.
- In la raaco tilmaamaha ay bixiyaan Waaxda Waxbarashada Oregon, iyo sidii loogu hoggaansamihi lahaa shuruucda caafimaadka dadweynaha ee laga jawaabcelinao xanuunka COVID-19.
- In diirada loo saaro isku xirka ardaydeena sidii ay ardaydu u heli lahayd baahiyaha aasaasiga ah, sida cuntada, kumbuyuutarada, taageerida shucuurta bulshada iyo inay helaan internet.

- Sidii loola shaqeyn lahaa asxaabtayada shaqaalaha, go'aana looga gaari lahaa sidii ugu wanaagsan ee loogu diyaar garaabayo iyo loo tababari lahaa waxa uu noqon doono sanad-dugsiyeed kale noociisu.
- Inay naga go'naato sidii aan u siin lahayn ardaydeena waxbarashada ugu wanaagsan ee suurtagal ah, marka laga yimaado qaabka loogu gudbinayo.
- In la sii wado qorsheynta gaadiidka, addeegyada nadiifayaasha iskuulada iyo addeegyada fara badan ee hawlaha iskuulada ka socda ee muhiimka u ah iskuuladeena iyo ardayda sidii u sameyn lahaayeen tilmaamihii loo dejiyey kala fogaanshaha iyo baahiyaha fayodhawrka.

Waxaan idiinka mahadcelineynaa samirkiina iyo fahamkiina. Waxaan rajeyneynaa in aan idinla wadaagno macluumaad fara badan todobaadka soo socda marka aan soo afjarno qorshahayaga xilliga Dayrta 2020. Waxaan idiin rajeyneynaa nabadgelyo, caafimaad iyo Maalinta Xoriyada ee maalinta Sabtida ku soo aadan.